



Tallooyinka Codsiga ee TOT-ga Wacyiga Daryeelka Carruurta ee Minnesota

Qandaraaska Tababaraha/Taageerada RBPD wuxuu bixiyaa Tababarka Tababarayaasha oo ku saabsan manhajyo kala duwan. Yoolkeenna waa in la helo tababarayaasha ugu fiican ee manhaj kasta. Hoos waxaa ku xusan tallooyinka loogu talagalay buuxinta codsigaTOT-ga.

Codsiga Bogga 1aad ee 4aad

Waa maxay TOT-ga aad codsaneyso? (DOORO MID) *

Calaamadee TOT-ga aad isku diiwaangelinayso, kooxda TOT-ga waxay kala sooci doontaa kuwan iyadoo la raacayo sida aad u xulatey TOT-ga

Codsiga Bogga 2aad ee 4aad

Magaca:

- U qor magacaaga oo saddexan sida uu ugu muuqdo Develop
- Wakhtigan waa wakhtiga ugu wanaagsan oo aad ku eegi karto Haybsashadaada Tababaraha Develop si aad u hubiso in uu yahay mid wakhtiga la socdo

Cinwaanka:

- Isticmaal Cinwaanka, Magaalada iyo Furaha Degaanka ee ku jira Develop

Magaalada:

FurahaD

egaanka:

Degmaa:

- Degmada waa in ay isku-dhigmaan Magaalada Cinwaanka iyo Furaha Degaanka ee kor ku xusan

Iimaylka:

- Isticmaal iimaylka ku jira Develop

Telefoonka:

- Isticmaal taleefoon lambarka ku jira Develop

Imisa luuqadood ayaad tababarka ku bixisaa?

- Calaamadee sanduuqa hoose ee aad raaxo ku qabtid in aad tababarka ku bixiso

Luuqadee (luuqadahee) ayaad tababarka ku bixisaa?

- Calaamadee luuqadaha aad raaxada ku qabtid in aad tababarka ku bixiso*

Intee in le'eg ayaad diyaar u tahay in aad socdaasho si aad tababar u bixiso?

- Calaamadee inta maylal ee aad diyaar u tahay in aad socdaasho, bixi macluumaadka saxa ah ee sida aad raaxada ku qabto in aad gaari wado. Rabitaanka in aad gaari u wadato maylal badan waxay ku siin doontaa dhibco badan*

Mala shaqaysaa bulsho qabiil?

- Tababarayaasha Minnesota sidoo kale waxay la shaqeeyaan barnaamijyadeenna qabiilka, bixi macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan waayo-aragnimada aad u leedahay qabiillada, barnaamijkooda daryeelka carruurta iyo sharciga qabiilka*

Mala shaqeysaa bulshooyin kala duwan?

- Bulshooyinkeenna daryeelka carruurta waa kuwo aad u kala duwan, bixi macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan waayo-aragnimada aad u leedahay bulshooyinka kala duwan Inta aad ka fakareyso su'aashan marka hore waa in aad qeexdo kala duwanaanshaha ka jirta Daryeelka Carruurta Minnesota, tani waxay u dhaxeeyn kartaa dhaqanka, juqraafiga, dhaqaale-bulsho, diinta ama meelaha kale.*

Codsiga Bogga 3 aad ee 4aad

Heerka Tababaraha MNCPD:

- Qeybtan waxaad ku qoraysaa haddii aad tahay Bare Xeeldheere ah, Tababare 2aad iwm - tani waa in ay u dhiganto Magacaabidda tababaraha ee aad ka heshay MNCPD*
- Khubburrada Maaddada: Khabiirka maado kasta ee ku habboon waa in ay ku soo daraan nuqulka waraaqda ee aad ka heshay MNCPD oo sheegaysa Maaddada (lagu qoray foomka Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Karti-xirfadeedka) ee aad xaqa u leedahay in aad tababarka ku bixiso*

Khubburrada Maaddada:

- Ma ahan in dhammaan khubburrada maaddada ay xaq u leeyihiin in ay ku tababarqaataan maaddooyinka oo dhan; iyagoon soo gudbin waraaqdan, kooxdaada ansixinta TOT-gaaga ma awoodi doonaan in ay kugu daraan TOT.*
- Waraaqdan waxaa lagu soo darey xirmadaada Ansixinta Tababarahaaga, haddii aad u baahan tahay nuqul la xiriiir support@mncpd.org*

Aqoonsiga Develop:

- Waa in aad bixiso Aqoonsigaaga Develop. Aqoonsiyada shakhsiga iyo kuwa tababaraha waa isku mid*

Dhammaadka Muddada Tababaraha:

- Qaybtan waxaad ku qoraysaa taariikhda ay dhammaanayso muddadaada Tababaraha, waxay ku taalaa dhanka midig ee haybsashadaada Develop
- Tusaale:
 - Aqoonsiga Shaqada: [REDACTED]
 - Xubinnimada Shakhsi: [REDACTED]
Muddada ay dhammaanayso: 4/30/2017
 - Tababare: Macalin Tacliinta Sare
Muddada ay dhammaanayso: 5/31/2018

Codsiga Tixgelinta Gaarka ah:

- Maka soo baxdaa heerka tababaraha loo baahan yahay ee ugu yar?**
 - Marka halkan aad joogto dib u eegis ku samee shuruudda tababaraha ee kor ku xusan, haddii aadan ka soo bixin waa IN AAD buuxiso Codsiga Tixgelinta Gaarka ah
- Haddii aadan ka soo bixin shuruudaha tababaraha ugu yar ee loogu talagalay TOT-gan, waa in aad buuxiso goobtan.**
 - Haddii aad si cad u buuxiso foomkan waxaad la mid tahay sida tababare kastoo kale ee xaq u leh in loo oggolaado TOT-ga

Sababtoo ah kama soo bixin shuruudda looga baahan yahay tababaraha ee ugu yar, ma wadaagin waxbarashadaada iyo waayo-aragnimada kaa dhigaysa musharax u qalma TOT-gan (500 eray ama ka yar):

- Sideed ku abuurtaay Horumarkaaga Xirfadeed iyo Waxbarasho ee maaddada TOT-gan?
- Waa maxay qorsheyaashaada ee aad ku kordhinayso Horumarkaaga Xirfadeed iyo Waxbarasho ee maaddada TOT-gan?
- Waxaannu si aad ah ugu talinaynaa shaqo koorso ku saleysan CEU am qaab ammaah ah. Ma ogtahay tababare ahaan in aad xaq u leedahay deeqda waxbarasho ee TEACH www.childcareawaremn.org

Codsiga Bogga 4aad ee 4aad

Noo sheeg shaqo-siiyahaaga hadda iyo jagada shaqada, ku soo dar taariikhda bilowga (500 eray ama ka yar):

- Goobtan KELIYA geli goobtaada shaqada ee hadda, jagada shaqada iyo taariikhda bilowga

Noo sheeg sida shaqadaada hadda iyo mas'uuliyadahaaga ay ula xiriiraan TOT-gan (500 eray ama ka yar):

- Si kooxda TOT ay u fahanto sida shaqadaada HADDA ay u khuseyso TOT ee aad codsanayso waxaan doonaynaa in aan aragno sida aad ugu isticmaalayso qalabkan waayo-aragnimadaada ee maalin kasta ah

Qor liiska waayo-aragnimo xirfadeed kastoo hore ee la xiriirta TOT-gan oo ay ka mid yihiin taariikhaha (500 eray ama ka yar):

- Si kooxda TOT ay u fahanto sida waayo-aragnimadaada xirfadeed ee hore ay ula xiriirto TOT ee aad codsanayso, waxaan doonaynaa in aan aragno sida aad u adeegsatay qalabkan ka hor shaqadaada hadda

Waayo-aragnimo Waxbarasho (500 eray ama ka yar):

- Qor liiska jagada, taariikhda, saacadaha ama CEUs ee loogu talagalay dhammaan shaqada koorsada ama horumarka xirfadeed ee aad dhammeysay shantii sannadood ee la soo dhaafey gudahooda ee la xiriirta TOT-gan
- TOT-yadii hore ee laga yaabo in aad qaadatey **looma** xisaabin doono Waayo-aragnimo Waxbarasho;
- Waxa **loo** xisaabin doono Waayo-aragnimada Waxbarasho “ee la xiriirta TOT-gan?”
- Halkan waxaa ku qoran tusaalaha waxa aad u soo bandhigi kartid **Kormeeridda TOT-ga Ammaanka:**

- o Kormeerka Firfircoon: Badbaadada Guriga Dibaddiisa 2 saac (3-29-2017); Jahwareerka Madaxa ee Ka Dhasha Gaboodfalka La Xiriirta Caafimaadka Carruurta 1.5 saac (8-14-2016); Aasaaska Koriinka Carruurta 45 dhibcood (5-20-296); Kormeerka Firfircoon- oo ay ka mid yihiin Carruurta leh Baahiyada Gaarka ah 2 saac (6-30-15); Ka-hortagga Gaboodfalka Carruurta iyo Dayacaadda 2 saac (12-8-15); Xaaladaha Degdegga ah 3 saac (4-21-2014); Carruurta iyo Nidaamyada Xakamaynta 3 saac (12-14-15); Cayayaanka Dadka Qaniina 1 saac (7-7-14).